

# Sheekada Ryan

Ryan Saunders, oo uu sawirkiisu kor ka muuqdo, ayaa ku dhawaad saddex jir ahaa markii uu si naxdin leh ugu geeriyooday isbitaalka. Dhimashadiisa ayaa la ogaaday in ay suuragal ahayd in laga hortago. Shaqaaluhu uma aysan lahayn Ryan aqoonta ay hooyadiis iyo aabihiis u lahaayeen oo kale. Markii ay Ryan waalidkiis ka walwalsanaayeen in ay xaaladiisu sii xumaanayso ma aysan dareemin in walaacooda wax looga qabtay waqtigii loo baahnaa.

Ryan's Rule (sharciga Ryan) ayaa la sameeyay si bukaanada da' kasta jira, oo qoysas kasta kasoo jeeda iyo daryeelayaasha loo siiyo hab kale oo ay caawimaad ku heli karaan.

**Si aad wax badan uga barato, tag:**
www.health.qld.gov.au/ryans-rule

**Wixii macluumaad dheeraad ah, la hadal kalkaalisadaada caafimaadka.**

Waxaa soo saaray Badbaadada iyo Tayada Bukaanka, Heerarka Caafimaadka Queensland (Patient Safety and Quality, Clinical Excellence Queensland ) oo kaashanaya dhakhaatiirta iyo macaamiisha.

Buugyarahan macluumaadka bukaanku waxa uu caawiyaa Cisbitaalka iyo Adeegyada Caafimaadka si ay u buuxiyaan Heerarka Adeegga Caafimaadka iyo Badbaadada Qaranka (daabacaadii labaad).

La-shaqeynta Macaamiisha
*Macaamiisha iyo / ama daryeelayaasha ra'yiga ay nala wadaageen ee ku saabsan daabacaaddan.*

Aqoonsiga iyo ka jawaabista xaaladaha aad uga sii daraya
*Bukaanada, qoysaska iyo daryeelayaasha ayaa awood u leh inay dalbadaan in si degdeg ah loo bixiyo daryeel.*

Buug-yarahaan waxaa lagu qaabeeyey ogolaansho iyadoo la raacayo Tilmaamaha Hal-abuurka Guud ee 'Call and Respond Early (CARE) ee badbaadada bukaanka' (Daabacaadda No 12/0040), oo ay soo saartay © Australian Capital Territory, Canberra, Sebtembar 2013
www.health.act.gov.au | www.act.gov.au

Gobolka Queensland (Caafimaadka Queensland) 2025
SW559 | v1.00 - 06/2025



# Hannaanka Xeerka Ryan

**Ma waxaad dareensantahay in adiga ama qofka ehelkaaga ah ay xaaladoodu kasii dareeyso, oo aad hada aad ugasii walwalsan tahay?**

**Waxaan u baahannahay inaan ogaano.**

Waxaan qiraynaa inaad qof kasta uga aqoon badan tahay qofka ehelkaaga ah.

Haddii aad ka walaacsan tahay xaalada caafimaad ee qof ehelkaaga ah , waxaa lagugu boorinayaa in aad caawimaad raadsato adigoo raacaya tallaabooyinka ku qoran buug-yarahaan.

**Xeerka Ryan ma ahan mid loogu talagalay Cabashooyinka Guud**

Queensland Government

## Isbitaalkaan wuxuu taageerayaa Xeerka Ryan (Ryan's Rule).

Inaad dalbato Xeerka Ryan (Ryan's Rule) ee Dib-u-eegista Caafimaad saameyn kuma yeelan doonto daryeelka la bixinayo.

## Yaa isticmaali kara Ryan's Rule?

- Dhammaan bukaanada
- Qoysaska
- Mas'uuliyiinta
- Daryeelayaasha.

## Waxa aad filan karto marka aad qaado Tallaabada Koowaad

Ka dib markaad u sheegto walaacaaga kalkaalisada ama dhakhtarkaaga, waxay isku dayi doonaan inay wax ka qabtaan dhibaatada ayna xaliyaan arrinta.

## Waxa aad filan karto marka aad qaado Tallaabada Labaad

Haddii aad weli welwelsan tahay markii la qaaday Tallaabada Koowaad ka dib, kalkaalisada caafimaadka ee markaas shaqada kujirta u sheeg, ayada ayaana dib u eegi doonta. Haddii ay dhibaatadaas xallin waayaan, waxay walaacaaga usii gudbin doontaa howlwadeenka caafimaadka ee adiga ku daawaynaya.

Fadlan u sheeg kalkaalisada masuulka ka ah haddii aadan weli qanacsanayn ka dib markaad qaado Tallaabada Labaad si aad u aragto inay wax kale samayn karaan si ay wax uga qabtaan arrinta ka hor inta aanad codsan dib u eegista Caafimaad ee Xeerka Ryan ee Tallaabada Saddexaad.

**Tani ma aha nidaamka Cabashooyinka Guud.**

Fadlan usheeg shaqaalaha haddii aad qabto cabasho guud waxayna kaa caawin doonaan qaabka saxda ah ee saas loo sameyn karo.

www.qld.gov.au/health/contacts/complaints





# Talaabooyinka Xeerka Ryan

### Tallaabada 1-aad:

Xaaladaada caafimaad ayaa ka sii dartay waadna walwalsan tahay.

La hadal kalkaalisada ama dhakhtarka.

### Tallaabada 2-aad:

Haddii Tallaabada 1 kabacdi aad weli walwalsan tahay, codso inaad la hadasho kalkaalisada mas'uulka ka ah.

### Tallaabada 3-aad:

Markii aad sameeyso Tallaabooyinka 1 iyo 2 ka dib, ee aadna qanacsanayn oo aysan xaaladaadu soo roonaaneyn, kawac 13HEALTH on 13 43 25 84 oo weydiiso in la sameeyo Xeerka Dib-u-eegista Ryan (Ryan's Rule Review).

13HEALTH waxay ku waydiin doonaan macluumaadka hoos ku qoran:

- Magaca isbitaalka
- Magaca bukaanka
- Lambarkaaga taleefanka ee lagaala soo xiriiri karo.

13HEALTH waxay xaqiijin doonaan in aad sameysayTallaabooyinka 1-aad iyo 2-aad ka dibna waxay kuu gudbin doonaan dhakhtar sare si loo qorsheeyo dib-u-eegis waqti ku haboon dhacda.